



Hadii midkiin soo galo masaajidka ha dhoho: Allahayow iifur albaabada naxariistaada, haduu baxayana ha dhoho: Allahayow waxaan ku waydiisanayaa fadligaaga

Abii Xamiid ama Abii Usayd wuxuu yiri: Rasuulka Ilaahay scw wuxuu yiri: "Hadii midkiin soo galo masaajidka ha dhoho: Allahayow iifur albaabada naxariistaada, haduu baxayana ha dhoho: Allahayow waxaan ku waydiisanayaa fadligaaga ".

[Xadiis Saxiix ah.] [Waxa wariyay Muslim.]

Nabigu scw wuxuu ku booriyey ummaddiisa ducada la oranaayo marka masaajidka la soo galayo:(Allahayow ii fur albaabada naxariistaada), oo Ilaahay la waydiisto inuu u diyaariyo asabaabta lagu helo naxariistiisa, markuu qofku damco inuu ka boxo masaajidkana uu dhoho: (Allahayow waxaan ku waydiisanayaa fadligaaga), oo Ilaahay uu waydiisto fadligiisa uuna u siyaadiyo ixsaankiisa ay ka mid tahay irsaqada xalaasha ah.

<https://sunnah.global/hadeeth/so/show/65092>

